

# Baro Khatarta aad ugu jirto in uu ku soo rito COVID



## **Dadka aadka ugu xanuunsada COVID waxay u baahan karaan daryeel isbitaal. Xitaa way u dhiman karaan.**

Inaad la socoto tallaalkaaga COVID waa habka ugu wanaagsan ee aad naftaada uga ilaalin karto in uu ku soo rito COVID.

Dadka qaar waxay aad uga nugul yihiin kuwa kale inay aad ugu xanuunsadaan COVID-xitaa haddii la tallaalo.

## **Sababaha dadka ka dhiga kugu u nugul inay aad ugu xanuunsadaan COVID**

### **Da'da weyn**

Khatarta daran ee xanuunka COVID waxay ku badan tahay dadka da'da ah, gaar ahaan dadka 50 sano jirka ah iyo wixii ka weyn.

### **Difaaca jirka ee daciifka ah ama liita**

Iyadoo ay sabab uu tahay xaalad caafimaad ama daawo daciifisa habka difaaca jirka, sida daawooyinka kansarka ama bararka lagula tacalo.

### **Xaaladaha caafimaad qaarkood**

Xaalada caafimaad qaarkood waxay sare uu qaadan khatartaada in ka badan kuwa kale. Hadbana inta ay badan yihiin xanuunadaadu, khatartaadu way sii badanaysaa. Xaalada guud ee caafimaadka ee kordhiya khatartaada waxaa ka mid ah:

- Xaaladaha wadnaha
- Cudurka macaanka
- Neefta iyo xaaladaha kale ee sambabada
- Kansarka
- Xaaladaha kelyaha ama beerka
- Miisaan badan ama cayil



**Kuwani dhammaan maaha arrimaha caafimaadka ee lala xiriiriyo khatarta sii kordheysa ee ah in uu ku soo rito COVID. Kala hadal dhakhtarkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka arrimaha ku saabsan caafimaadkaaga si aad u fahamto khatartaada.**

## **Daawaynta FDA ay fasaxday ama la oggolaaday ayaa la heli karaa si ay uga hortagto xanuun daran**

Haddii ay aad u badan tahay inaad aad u xanuunsato, waxaad u baahan tahay inaad bilowdo in laga daaweeyo COVID isla markaaba ka dib marka astaamuhu marka hore soo muuqdaan.

**Ha sugin.** Waa muhiim in si dhakhso leh lagu baaro haddii aad leedahay calaamadaha COVID. Daawada dhakhtarku uu ku soo qoray waa in la bilaabo maalmo gudahood marka astaamuhu aad isku aragto.

Xitaa haddii astaamahadu ay fudud yihiin, in COVID-kaagu la daweeyo xili hore iyadoo la adeegsanaayo daawa uu ku qoray dhakhtar ama bixiye kale oo daryeel caafimaad oo idman waxay ka dhigi kartaa cabuqaaga mid aan aad u daraneyn waxayna kaa caawin kartaa inaad ka fogaato isbitaal. Waxay badbaadin kartaa nololshaada.

**Kala hadal dhakhtarkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka khatarta aad u leedahay in uu ku soo rito COVID.**

**Wax badan ka baro [cdc.gov/covidtreatment](https://www.cdc.gov/covidtreatment)**